IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMALIYA

الجمهورية الصومال الدمقراطية

Sannadka 11aad Muqdisho 29 Abr. 1983 1 r 4

FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S. QIIMADU waa 5 Shlin lambar waliba—RUKUNKA: Sannadii waa Shs. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxoo ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanka waxaa a weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah—lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## KOOBNIIN

### QAYBTA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 4 ee 13 Abr. 1983, U rogid Sharci, Xeer Sharci Lamb. 2 ee 18 Maarso 1983. BOG. 210

SHARCI L. 5 ee 2 Abr. 1983, Sharci ku saabsan dib u soo celinta Wakiilada Ganacsiga Dibadda. » 213

### QAYBTA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA J. D. S. L. 9 ee 6 Abr. 1983, Meel marin Heshiis dhexmaray Dawladda Qadar iyo Dawladda J. D. S. Kuna saabsan Shaqaalaha Soomaaliyeed ee ka shaqayndoona Dalka Qadar. » 218

Sharci Lambar 5 taariikh 2 Abriile 1983 Sharci ku saab san dib u soo celinta Wakiilada Ganacsiga Dib/da.

MADAXWEYNAHA J. D. S.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Haddii aan si ka duwan loo micneyn, erayada soo socda mid kasta waxaa loola Jeedaa micnaha ku kor qoran:

1. Wakiilnimo waxaa loola jeedaa hawl kasta oo la xiriirta ganacsi, adeeg, mihnad iyo wixii u dhigma oo ganacsade ama shirkad degan Dalka dibaddiisa qoraal ahaan ugu wakiilatay fulinta hawlaheeda, Dalka J. D. S. Gudihiisa, shakhsi kale oo dabiici ama qaanuuni ah.

2. Wakiil ganacsi waxaa loola jeedaa shakhsi kasta oo dabiici ama qaanuuni ah, xaqna u leh in uu Dalka J. D. S. ka qabto hawl ganacsi ama dhaqaale oo shakhsi kale ee dabiici ama qaanuuni ah u wakiishay fulinta hawlo la xiriira ganacsi, adeeg, mihnad, IWm.

3. Wakiishe waxaa loola jeedaa ganacsade ama sharikad degan Dalka dibaddiisa oo u wakiishay fulinta hawlo la xiriira ganacsi, adeeg, mihnad, iwm, shakhsi kale oo dabiici ama qaanuuni ah oo degan Dalka gudi hiisa.

4. Khidmad waxaa loola jeedaa wixii lacag ah oo wakiilku ku muteysto hawsha wakiilnimada.

Qod. 2aad

1. Waxaa la fasaxay hawshii wakiilnimada ganac siga.

2. Shaqada wakiilnimada ganacsiga dibadda wax aa loo qaadanayaa shati uu bixiyo Wasiirka Wasaarad da Ganacsiga, isagoo la kaashanaya Wasaaradaha ka

3. Wakiil Ganacsi waxaa noqon kara qof kasta oo dabiici ama qaanuuni ah oo jinsiyaddiisu Soomaali ta hay, buxiyana shuruudaha kutilmaaman Sharcigan iyo Xeer hoosaadkan.

4. Qof Ajnabi ah waa la sii karaa shati wakiil nimo, haddii muwaadiniinta Soomaaliyeed looga og gol yahay Dalka uu jinsiyadiisa haysto in ay ka qabtaan hawl taa u dhiganta.

Qod. 3aad

a) Waxaa reeban in ruqsad wakiilnimo la siiyo:

Qof da'diisu aanay gaarin 18 sano oo buuxda ama maxkamadi caddaysay in uu garaad laawe yahay.

b) Qof xukun ciqaab ah looga joojiyay dhaqdha qaaq ganacsi, xaaladaha iyo muddada sharcigu tilmaa may gudahooda.

t) Qof lagu caddeeyo bisaylnimo, ilaa muddo shan sano ah, laga billaabo taariikhda xukunka kama damba ysta ah oo musalifnimada.

Qod. 4aad

1. Ruqsadda ku sheegan qodobka 2aad faqradda 2aad ee sharcigan, Wasiirka Wasaaradda ganacsigu wuxuu ku bixinayaa codsiga daneeyaha.

2. Codsigu waa in ay la socdaan shuruudaha lagu bixinayo shatiga Wakiilnimada.

Qod. 5aad

1. Wasaaradda Ganacsiga, marka ay hubiso waa faqsanaanta codsiga shuruudaha ku tilmaaman sharci gan iyo Xeer hoosaadnimadiisa, waxay doonayaan in codsiga oo kooban lagu dhejiyo muddo 30 maalmood ah, looga ogoysiika ee Wasaaradda Ganacsiga iyo rugta Ga nacsiga.

2. Qof kasta oo dan ka leh wuxuu ka keeni karaa is hor taag, 39 maalmood gudahood, laga bilaabo taariikhda ba ndhigga ogeysiiska.

Qod. 6aad

Oggolaanshaha ama diidmada shatiga wakiilnima da waa in la sababeeyaa, iyadoo wakiilku go'aanka Wa siirka Wasaaradda Ganacsiga ka qaadan karo cabasho Maxkamadeed.

Qod. 7aad

1. Wakiilku ma dhaqan gali karo hawlaha wakiil nimada inta ka horeysa qaadashada shatiga wak/mada

2. Qofka shati wakiilnimo leh wuxuu Wasaaradda Ganacsiga u soo gudbinayaa magacyada ciddii kale oo hadba soo wakiilata, waxaana soo raacinayaa qoraalka lagu soo wakiisho iyo hashiiska ku cad qodobka 10aad faqradda 1aad ee sharcigan

Qod. 8aad

Wakiilka Ganacsiga Dibaddu kama qayb gali karo Qandaraas ay hay'ad Dawladeed soo bandhigtay had duusan codsiga ka qayb galka qandaraaska ku soo li faaqan caddeyn inaan Canshuur lagu lahayn, taasoo uu ka keenayo Xafiiska Canshuuraha tooska ah ee Wa saaradda Maaliyadda.

Qod. 9aad

1. Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga marka uu bi xiyo shati wakiilnimada waa in Wasaaradda Ganacsi ga diiwaan geliso sharikadaha iyo ganacsatada ajnabi ga ah ee Soomaaliya ku leh Wakiilka.

2. Wasaaradda Ganacsiga waxay rugta Ganacsi ga Warshadaha iyo Beeraha iyo Hay'adaha hadba ku shaqada leh u gudbin doontaa magacyada Wakiillada Ganacsiga Dibadda ee Dalka jooga, cidda ay wakiilka ka yihiin xadka awoodooda.

Qod. 10aad

1. Heshiiska dhexmaray wakiishaha iyo wakiilka oo la xiriira dhidmadda waa in wakiilku ka keeno laba nuqul oo midna ku hari doona Wasaaradda Ganacsiga midna loo gudbin doono Bankiga dhexe ee Soomaaliya, marka la bixiyo shatiga wakiilnimada.

2. Bankiga dhexe ee Soomaaliya waa in uu hubiyo lacagta Adag ee khidmad ahaan uu u muteystay wa/iku.

Qod. 11aad

Wakiilka Ganacsiga Dibadda waxaa ka reeban in uu khidmadda ku keydsado Dalka dibaddiisa, ama ba deeco Dalka ku soo geliyo aan loo oggolaan, ama ku qaa to shiilin Soomaaliga, ama dib u dingo soo xareenteeda, ama uu qaar kula hadho dibadda.

Qod. 12aad

1. Qofkii si ulakac ah u gala falka ku tilmaaman qodobka hore, haddii falku uusan keeneynin dembi ka weyn, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa hal sano oo xarig ah, ama ganaax gaaraya 10 jibaar qiimaha khidmadda, ma rka falku yahay mid si gaar ah u culus, waxaa la isu raa cinayaa xarig iyo ganaax.

2. Falku haddii uu yahay mid kama loo galay ciqaa bta waxay noqoneysaa ilaa Saddex bilood oo xarig ah ama ganaax ilaa shan jibaar qiimaha khidmadda.

3. Ciqaabta ku tilmaaman faqradda 1aad ee qod. Dambiilaha waxaa loo raacin karaa ruqsadda wakiilni mada oo lagala noqodo.

Qod. 13aad

1. Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga, muddo Lix bilood ah gudahood, laga bilaabo taariikhda dhaqan ga lka sharcigan, wuxuu soo saarayaa Xeer dhammeystira ya, laguna fulinayo sharcigan.

2. Xaddidaadda canshuurta ku waajibta cidda sha tiga wakiilnimo qaadaneysa, waxaa lagala tashanayaa Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

Qod. 14aad

1. waxaa la burriyay sharciga tirsigiisu yahay 45 ee 10.7.75 oo lagula wareegay wakiilnimada Ganacsiga Dibadda.

2. Sidoo kale waxaa la buriyay sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan,

**Qod. 15aad**

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa maalinta uu sa xiixo Madaxweynaha J· D· S. Waxaana lagu soo saara yaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 2 Abr. 1983

MADAXWEYNAHA J· D· S.

(Maxamed Siyaad Barre)